



PORTLAND
PUBLIC
SCHOOLS

Kaalay nala hadal!

***Goobta: MAKTABADDA George
Middle School***

***Goorta: Arbacada, 13ka
Nofeembar, 5pm***

***Kuwee: Ardayda, Waalidka,
Mas'uuliyiinta***

Dib-u-eegista Siyaasada Habdhaqanka iyo Anshaxa Ardayga



Siyaasadayada ayaa
cusbooneysiin lagu
sameynayaa si ay u
dhiirigeliso dhaqanada
ka warqabida
jaah-wareerka iyo soo
celinta fay-o-qabka.

Hanaanada anshaxa waa in loo isticmaalaa inay ardayda ka taageeraan barashada xirfadaha iyo fikradaha loo baahan yahay si loo kobciyo jawi dugsi oo fiican loogana fogaado dhaqanada xun.

PPS waxay raadineysaa inay meesha ka saarto farqiga u dhexeeya hanaanada anshaxa iyadoo la xaqiijinayo waxka qabadyo ay u wada siman yiin dhammaan kooxaha jinsiyadaha iyo qowmiyadaha, jinsiga, kuwa naafada ah, iyo kuwa kale ee la ilaaliyo.

Mabaa'diida Anshaxa ee Lasoo Jeediyay

- A. Anshaxu waa inuu ahaadaa mid dhexdhexaad ah, daah-furan, aan dib dhicin, caddaalad ah, koritaan ahaana habboon kuna saleysan baahida ardayga khaaska ah (ORS 339.250)
- B. Dhaqanada anshaxu waa inay dhiirigeliyaan ka hortaga oo ay adeegsadaan waxka qabadyada waxtarka leh kadib marka uu habdhaqanku dhaco, iyadoo raadinaya hagaajinta wixii waxyeelo ah ee ka dhashay.
- C. Dugsiyadayadu waxay sameyn doonaan dedaal kasta oo macquul ah si ay mudnaanta u siiyaan waxka qabashada habdhaqanka ardayga iyada oo loo marayo qoyska, dugsi, iyo ilaha ku saleysan bulshada, si fiicana uga warqaba jaah-wareerka. Tan waxa ku jira beddelada waxbarasho ee tallaabada anshaxa.
- D. Waa in la tixgeliyaa saameynta jaah-wareerka iyadoo ay himiladu tahay yareynta wakhtiga ka maqnaanshaha fasalka. Anshax marinta ka saarista [fasalku] waa tallaabada u dambeysa.

